**Sharciga 10 Noofember 1961, lamba. 26.**

**In tas-hiilaad xagga dekadaha ah la siiyo qalabka ugu horreeya, ee wershadaha iyo beeraha uu maamulo qof kaliya iyo baarista macdanta, iyo weliba hayadaha loo dhisay horumarinta bulsho, ee Soomaaliya**

## MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Markuu arkay oggolaanshaha Golaha Xeerdejinta (Sharciga);

## WUXUU GUDDOOMINAYA

Sharciga soo socda:

### Qod. 1

Waxaa bixinta canshuuraha dekedda, ee xagga soo-dejinta wixii qalab ballaaran ah, ee u socda wershedaha iyo beeraha yy maamulo qo kaliya, dad ku hawlan baaris macaadin, kuwaas oo ay ku jiraan kuwa batroolka, iyo weliba Hayado ujeeddadoodu tahay horumarinta bulsho, ee Dowladda, waa haddii waxaasi yihiin qalab culus oo lagama maarmaan u ah rakibaadda kowaad iyo jahaynta shaqada amaba ballaarinta kuwa hadda jira oo keenaya in la geliyo raasumaal aan ka yarayn boqolkiiba labaatan, ee kan horey loo geliyey, oo lagu goynaayo hababka lagu tilmaamay xeerhoosaadka ku lifaaqan Sharcigan.

Canshuur dhaaf kaas la mida waxaa la siinayaa Hayado, xataa leh dabeecad caalami iyo xagga soo-dejinta qalabkaas qudhiisa oo uu soo dejinaayo Maamulka Guud, waabase haddii loo jeheeyey ahdaf bulsho iyo ujeeddooyin wershado iyo jehayn hawlaha beeraha iyo xannaanada xoolaha, ee Soomaaliya.

Qalab ballaan, waa in loola jeedo hal makiinad ama makiinado badan, cadadkooda iyo wixii raacsan, aalado, saabaan iyo agab, oo dhammeystiri kara shaqo xilliyeed, ee wax-soo-saar, iyo baariseed, amaba gebi ahaan kaafin karta hal ujeeddo bulsho.

### Qod. 2

Canshuur-dhaadka dekadeed, ee xagga soodejinta saabaanka ku xusan Qod. hore waxaa idmaaya (ruqseynaaya) Agaasinka adeegyada dekadaha, markii ay cosi soo qortaan dad ka danta leh, waxayna loo shardinayaa hubinta halka run ahaantii la geynaayo iyo in laga hawlgalayo qaybaha hayadaha awgood loo soo dejiyey (waariday) canshuur laáanta.

Soodejinta saabaankaas waxaa fulin kara xataa dhowr maalqabeen, bishardi in ay ku fuliyaan (sameeyaan) sanad gudahiis, laga bilaabo taariikh codsiga la qaddimay.

Goynta Wasiirka Maaliyadda (Lacagta), iyo baahi la caddeeyey, ayaa lagu oggolaan karaa dheereynta muddadaas, ilaa ugu badnaan sanad kale, xagga soodejinta, ayaga oo leh canshuur-dhaaf , makiinadaha iyo alaabada kala duwan, oo lagu daray liiska horey loo qaddimay, ama lagu tilmaamay codsi kale oo uu Wassirka Lacagta (Maaliyadda) idmi (ruqsayn) karo in lagu qaddimo muddada la soo sheegay.

### Qod. 3

Alaabada canshuur-dhaafka lagu soo dejiyey waa in lagaga hawlgalo wershadaha iyo Hayadaha lagu tilmaamay dokumentiyada lagu lagu bixiyey canshuur-dhaafka shardiga ku xiran, oo haddii laga waayo uu canshuur-dhaafka waxma jiraan noqonayo, lix bilood

gudahood oo ka bilaabata taariikhda la soo saaray bolletada dekedda. Muddadaas waxaa la kordhin karaa lix biloodoo kale, oo ku imanayso góaan uu soo saarayo Wasiirka Lacagta (Maaliyadda), kaddib codsi sababeysan oo ay qoree maalqabeenka ama hayadda danta ka leh.

Hubinta isticmaalka (ku-hawlgalka) alaabadaas qudheeda, ayada oo laga duulayo codsi uu soo qoray maalqabeen ama ay soo qoratay hayad ka dan leh, xafiisyada dekedda ay ayaa toos u fulinaya ama ayaga oo u maraya Madaxda Maamulka, ee goobta laga hawlgalay isla alaabadaas qudheeda.

**Qod. 4**

Marka helo canshuur-dhaafka soodejinta oo kama dambeysta ah, maalqabeenka ama hayadda ka faaiideystay, alaabadaas canshuur-dhaafka lagu soo dejiyey uma isticmaali karaan ujeeddo ka baxsan tan ay caddeeyeen loona hubiyey sida uu dhigayo Qod. hore, kamana saari karaan goobta ka hawlgalka, ee loogu talagay, ayaga oo aan horey u wargelin xafiisyada dekedda oo awoodda iyo ikhtisaaska, ayanna bixin xuquuqda dekadeed, ee saaran alaabtaas, haddii ayasa caddeyn in alaabtu tahay mid aan la istimaali karin oo ku dhaqa ku doogowday iyo sabab kale, oo maalqabeenka ana hayaddu góaansaday/goáansatay doortay/doorатay in la baabiíyo.

Maaqabeennada loo ruqseeyey baaritaannada wixii batrool iyo macaadin ah waxaa loo idmay (looruseeyey) in guurguurid, oo ay meel ka raraan, meel kala u raraan alaabada iyo qalabka baaritaannada oo ay canshuur-dhaafka ku soo dejiyeyee (waaridee).

**Qod. 5**

Xadgub kasta, ee Qod. hore, waxaa loo qaadanayaa kontorobaan.

**Qod. 6**

Dhammaan saabaan laga gaday gudaha Soomaaliya, loona jeheeyey ujeeddooyinka ku xusan Qod. 1aad, ee Sharcigan, waxaa loo celinayaa keliya canshuurta dekedaha oo lagu bixiyey soo gelintooda Dalka.

**Qod. 7**

Is-qabadyada ka dhasha (aloosma) dabbaqidda Sharcigan waxaa lagu xallinayaa hab-raaca jira, oo loo dejiyey isqabadyada dekedaha.

**Qod. 8**

Góaan gooni ah ayaa lagu saarayaa xeerar lagu hirgelinayo Sharcigan.

**Qod. 9**

Waxaa la baabiíyey dhammaan wixii axkaam hore ah ama si kastaba ka soo horjeeda Sharcigan.

**Qod. 10**

Sharcigan waxa uu dhaqangelayaa laga bilaabo taariikhda lagu nashriyo Faafinta Rasmiga.

Sharcigan waxaa la gelinayaa Uruurita Rasmiga, ee sharciyada, waxaana lagu nashrinayaa Faafinta Rasmiga.

Qof kasta oo leh waa lagu khasbaa in uu dhowro, una dhowro sida sharci ay leedahay

Jamhuuriyadda.

Taariikhda Muqdisho, maanta oo ah 10ka Noofember 1961.

**Aden Cabdulle Cusmaan**

Wasiirka Kowaad
**Dr. Cabdirashiid Cali Sharmarke**

Wasiirka Lacagta
**Cabdulqadir Maxamed Aden**